# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Golaha Wakiilladda




# WARBIXINTA

## Shir-gudoonka ee Wax-qabadkii kal-fadhigii 13aad

06 December 2025 illaa 15 February 2026



# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Golaha Wakiilladda

**WARBIXINTA**

**Shir-gudoonka ee Wax-qabadkii kal-fadhigii 13aad**

**06 December 2025 illaa 15 February 2026**

# ARRAAR

## Mudanayaal.

*Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 14aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhiyadii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore aynaan dhamaystirin.*

*Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena iyo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadka kal-fadhigii 13aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhiyadaas.*

## HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation). Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021, waaGolihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho, waana Golihii 5aad (shanaad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee hore waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo xulay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo xulay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo xulay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay ee shacabku si toos ah u soo doortay September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodooda waxa qeexay Dastuurka Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, waa xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo illaalinta siyaasada guud ee dalka lagu hagayo, ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, ogolaanshaha cashuuraha, assaasida keydka dhakhliga Somaliland, daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer oo uu leeyahay guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 guddi Sida ku cad xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 13aad mudaddii u dhexaysay **06 December 2025 illaa 15 February 2026**. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 13aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

## WAX-QABADKA KAL-FADHGII 13AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 13aad ee Golaha Wakiillada***

1. Fadhiyadii Golaweynaha ee *Kal-fadhigii 13aad* — 20 Fadhi
2. Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn — 25 Kulan
3. *Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada* — *45 Fadhi/kulan*

## WARBIXINADII GOLEWAYNAHA LAGA HOR JEEDIYAY KAL-FADHIGII 13AAD

Waxa Kal-fadhigii 13aad Golaha laga horjeediyay **08 Warbixinood** oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| **07 Dec 2025** | Warbixint Odoroka Miisaaniyada Qaranka ee Sannadaka 2026ka | Md. Cabdilaahi Xasan Aadam Wasiirka W. Maaliyada |
| **08 Dec 2025** | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 12aad | Md. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| **13 Dec 2025** | Warbixinta Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Aadan Xarbi<br>Gud. Ku-xigeenka Gudidda |
| **14 Dec 2025** | Warbixinta Wasiirka Cadaalada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Kaalmada Sharci | Md. Yoonis<br>Wasiirka W. Cadaalada |
| **15 Dec 2025** | Warbixinta Gudidda Arrimaha Dibada ee labada xeer ee kala ah Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maalgashiga iyo Qabyo-qoraalka Xeerka Warshadaha | Gudoomiyaha Gudidda<br>Md. Maxamed Xassan Siciid iyo Gud ku-xigeenka Gudidda<br>Md. Cabdinaasir Qodax |
| **23 Dec 2025** | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha ee Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2026 | Md. Xuseen Ismaaciill<br>Gudoomiyaha Gudidda |
| **03 Jan 2026** | Warbixinta Wasiiirka Kalluumaysiga iyo Khayraadka Bada ee horumarinta kalluumaysiga, iyo ka faa'iidaysiga khayraadka badda dalka. | Md Cali J. Faarax (Buureed)<br>Wasiirka W Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda |
| **24 Jan 2026** | Warbixinta Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda U Diyaargarawga Aafooyinka | Md. Saleebaan M. Faarax (Goox) Gudoomiyaha Gudidda |
| **04 February 2026** | Warbixinta Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga Wax ka Beddelka iyo Kaabista Xeerka Tamarta Korontada | Md. Saleebaan M. Faarax (Goox) Gudoomiyaha Gudidda |

## XEERARKA GOLUHU ANSIXIYAY

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | U gudbay |
|---|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Booliiska | 20/01/2026 | Madaxweynaha |
| 2. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Hay'ada Maaraynta Masiibooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka (NADFOR). | 01/02/2026 | G. Guurtida |
| 3. | Wax ka Baddelka iyo Kaabista Xeerka Tamarta Korontada | 04/02/2026 | G. Guurtida |
| 4. | Wax ka Baddelka iyo Kaabista Xeerka Warshadaha | 07/02/2026 | G. Guurtida |

## XEERARKA DHAQANGALAY

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda Dhaqangalka |
|---|---|---|
| **1.** | Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'addaha Maalyadeed | 13/01/2026 |

## MOOSHINADII GOLAHA LA HORKEENAY

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Ansixintii |
|---|---|---|---|
| 20 Jan 2026 | Mooshin ku saabsan Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Hantidhawraha Guud ee Qaranka Xeer Lr. 76/2026 | Md. Maxamed J. Liibaan | Ma Ansixin |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2025ka

**07 December 2025** ayaa Xukuumada Cusub ee Xilka la wareegtay bil ka hor waxay Golaha Wakiillada u soo gudbisay Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2026ka.

Waxaana Golaha Miisaaniyadaas warbixin ka siiyay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Dhaqaalaha **Md. Cabdilaahi Xasan Aadan.** Intaas ka dib, wuxuu Gudoomiyuhu Mudanayaasha ku wargaliyay in sida habraacu yahay Miisaaniyada lagu wareejinayo Gudiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada si ay waajibaadkeeda uga soo gudato warbixina Golaha uga soo siiso, iyadoo wakhtiga oo cidhiidhi ah iyo Miisaaniayda oo raagtay darteed wuxuu Gudiga faray inay sida ugu deg-dega badan ay Golaha ugu soo celiso.



Gudiga Dhaqaaluhu waxay dib ugu soo celisay oowarbixina ka siisay Golewaynaha **23 December 2025** Ugu dambeyn, wuxuu Goluhu **fadhigaas** cod gacantaaga ku meel-mariyay Ansixinta **Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2025ka**



## 1. Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Golaha horyaala

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka |
| 8. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Wax ka badelka Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Wax ka badelka Xeerka Ciqaabta Guud | Gud. Garsoorka, Cadaalada & X. Insaanka |
| 11. | Wax ka badelka Xeerka Jinsiyada | Gudidda Arr. Gudaha & Nabadgalyada |
| 12. | Xeerka Is-garabsiga Dawaladaha iyo Ganacsiga Gaarka ah | |
| 13. | Xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadiinta | |
| 14. | Xeerka Kaalamada Sharci | Gud. Garsoorka, Cadaalada & X. Insaanka |
| 15. | Xeerka Gudniinka Fircooniga ahFGM | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 16. | Xeerka Caafimaadka | Gudidda Arrimaha Bulshada |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

### J. XeerarkaGuurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Sharciga Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliiyada | Madaxweynuhu soo celiyay |
| 3. | Wax ka badelka Xeerka Booliiska | Madaxweynuhu soo celiyay |

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & K. Raashinka (NADFOR) | Golaha Guurtida |
| 2. | Wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Tamarta Korontada | Golaha Guurtida |
| 3. | Wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Warshadaha | Golaha Guurtida |

## WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA EE KAL-FADHIGII 13AAD

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi iyo Gudidda Hawlaha Golaha ay xubno ka yihiin Shir-gudoonka, Gudoomiyayaasha 10 Gudi iyo Xoghayaha Guud, waxayna kala yihiin:-

1. **Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee)**
2. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
3. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
4. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
5. Gudidda Arrimaha Bulshada
6. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
7. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
8. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
9. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
10. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
11. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban. Hadaba, qaybtan waxaynu si kooban ugu soo gudbinaynaa Wax-qabadkii Gudi kasta ee kal-fadhigii 13aad oo kooban.

### Isku Shaandhayntii Gudiyada ee Gudoomiyaha Golaha

**06 April 2026** Gudoomiyaha Golaha Wakiilladu isagoo ka duulaya Qodobka 54aad Farqadiisa 7aad ee Dastuurka, Qodobada 7aad iyo 8aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada, markuu arkay inay dhamaatay mudaddii Gudiyada oo ay gaadhay wakhtigii isku badelkooda.

Wuxuu degreeto gudoomiye ku soo saaray isku shaandhaynta Mudanayaasha Gudiyada, iyagoo 10 gudi ee Goluhu ka kooban yahay dhamaantood la isku shaandheeyay.

Intaa wixii ka dambeeyay xubnaha 10 Gudi waxay dhamaan iska dhex doorteen Gudoomiye iyo ku-xigeen cusub oo gudi kasta yeelanayso, taas oo ugu dambeyn Gudoomiyayashii hore ee Gudiyadu ay xilka ku wareejiyeen gudoomiyaha cusub.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida Joogtada ah iyo Anshaxa ee Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda sharci, hab-raac iyo siyaasadeedba, waxay diyaarisay warbixintan si Golaha loogu soo gudbiyo xog dhamaystiran oo ku saabsan hawlihii guddidu qabatay intii Goluhu fasaxa ku jirey **15 February 2026 – 19 April 2026**, iyo sidoo kale xaaladdaha qaran ee saameynta tooska ah ama dadban ku yeeshay Somaliland. Warbixintani waxay si gaar ah u eegaysaa saamaynta dagaalka Bariga Dhexe, tallaabooyinka ay Xukuumaddu qaaday, soo jeedinta sharci ee la xidhiidha istiqaaladda Xildhibaan Barkhad Jaamac Batuun iyo xaaladda abbaarta ka jirta dalka.

Warbixintu ma aha oo keliya warbixin xog ururin ah, balse waa dhukumenti xanbaarsan qiimayn iyo talo-bixin siyaasaddeed, oo ku waajahan Golaha si uu ugu hago go'aamada mustaqbalka. Guddidu waxay aaminsan tahay in dhacdooyinka caalamiga ah, gaar ahaan colaaddaha saameynta ku leh tamarta, gaadiidka badda iyo suuqyada cuntadu, ay si toos ah u saamayn karaan nolosha shacabka Somaliland, maadaama dhaqaalaha dalku uu si weyn ugu tiirsan yahay soo dejinta shidaalka, badeecaddaha iyo adeegyada kale ee muhiimka ah.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Maxamuud Xayir Ducaale Gudoomiye**
- **Md. Ibraahim Maxamed Jaamac (Guun) Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 58aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **25 December 2025** Gudiddu kulan la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Mudane Axmed Jaamac Barre.**
- **31 December 2025** Gudiddu waxay kulan xog-waraysi ah la yeelatay **Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha, Mudane Maxamuud Cige Yuusuf.**

### Xeerarka ay Gudiddu Golaha u soo gudbisay

- **24 Janaury 2026** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda U Diyaargarawga Aafooyinka
- **04 February 2026** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Tamarta Korontada

- **15 Dec 2025** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay laba Xeer oo kala ah Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maalgashiga iyo Qabyo-qoraalka Xeerka Warshadaha

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Liimo) Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Amiin Saleebaan Jaamac Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Goluhu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 60aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **15 December 2025** Waxay Gudiddu waxay kulan xogwareysi ah la yeelatay **Xisaabiyaha Guud ee Qaranka,** kulwankaas oo ujeedadiisu ahayd Xisaab Xidhadii 2023 iyo 2024.

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **25 January 2026** Guddida Dabagalka iyo Ilaalinta Hantida Qaranka iyo Guddida Dhaqalaha ee Golaha Wakiillada ayaa maanta kulan muhiim ah isugu yeedhay qaybo ka mid ah Hay'addaha Dawladda, Hay'adaha Caalamiga ah, Ururrada Bulshada, Jaamacadaha iyo Khubaro ku takhasusay Maamulka Maaliyadda iyo Arrimaha Hanti-dhawrka, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd soo bandhigidda Habraacyada kala duwan ee Guddiyadu ku shaqeeyan, kuwaas oo hagaya hawlaha dabagalka, hanti-ilaalinta, iyo hubinta isla xisaabtanka hay'adaha qaranka.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Cabdikariim Maxamed Muxumed Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Ibraahim Cali Jaamac (Suudi) Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Cali Xuseen Nuur (Beegsi) Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Axmad Cabdi Walhad Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadu iyo Ganacsiga iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 61[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka 2025

- **20 December 2025** Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga waxay Kulan Xog-warran ah oo ku saabsan Odoroska Miisaaniyada 2026ka ay la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Maaliyada Md. Cabdilaahi Xasan Aadam**

### Warbixinta Gudidda ee Miisaaniyada 2026ka

- **23 December 2026** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay Warbixinteeda Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2026ka.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Axmad Barkhad Hure Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Mubaarik Xuseen Maxamed (Xeel-dheere) Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 63[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kala-fadhi 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **18 December 2025** Gudidda Arrimaha Shareecada iyo Gudidda Arrimaha Gudaha ee Golaha Wakiiladu waxay si wada jir ah kulan ula yeesheen Taliyaha Ciidanka Bilayka

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaciil (Sokeeye) Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Xuseen Aadam Cabdi Gudoomiye ku-xigeen**

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 62[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **03 February 2026** Gudidda Hawlaha Guud waxay kulan shaqo iyo xog-waraysi la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud iyo Guryaynta Md. Xuseen Axmad Caydiid**

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Axmad Cali Casoowe Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Jimcaale Axmed Cilmi Gudoomiye ku-xigeen**

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kal-fadhiga 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **18 December 2025** Gudidda Arrimaha Shareecada iyo Gudidda Arrimaha Gudaha ee Golaha Wakiiladu waxay si wada jir ah kulan ula yeesheen Taliyaha Ciidanka Bilayka.
- **20 January 2026** Waxay Gudiddu waxay kulan xogwareysi ah la yeelatay **Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Md. Cabdilaahi Maxamed Carab (Sandheere).**
- **03 February 2026** Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga & Difaaca ee Goluhu waxay kulan shaqo la yeelatay **Dawladda Hoose ee Caasimadda Hargeysa oo hogaaminayo Ku-xigeenka Maayarka Md. Khadar Axmed Cumar.**

## Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **09 February 2026** Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga & Difaaca ee Golaha waxay kulan dadweyne u qabatay Xeerka Jinsiyadda Somaliland (Xeer Lr. 22/2002) oo gudiddu gacanta ku hayso si ay dadwenaha ula wadaagto Xeerkaas ugana qaybgaliso dadweynaha.

## Safaradii iyo Kormeeradii Gudiddu samaysay

- **04 February 2026** Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga & Difaaca Waxay Safar shaqo ku tagtay Gobolka Saaxil magaalo madaxdiisa Berbera, Gudidda oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guddida Md. Aadan Cismaan Xarbi.

  Gudiddu intii ay ku sugnayd Magaalada Bebera waxay la yeelatay Maamulka Dawladda Hoose ee Degmada Barbera oo uu hogaaminayo Duqa Magaalada Barbera Md. Cabdishakuur Maxamuud Cidin ayna Wehelinayeen Xoghayaha Dawlada Hoose ee Barbara iyo Xildhibaanada Golaha Deegaanka, waxaana kulankaas laga hadlay Xaalada Guud ee Nabadgelyada Degmada & Caqabado ka jira dhanka Xeerarka Maamulka.

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Cabdikariim Meecaad Isaaq Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Guuleed Maxamed Warsame Gudoomiye ku-xigeen**

# Gudidda Arrimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshada iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 64aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kal-fadhi ee Kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **20 January 2026** Waxay Gudiddu waxay kulan xogwareysi ah la yeelatay **Ururka Saxafiyiinta Somaliland ee SOLJA**
- **17 February 2026** Waxay Gudiddu waxay kulan xogwareysi ah la yeelatay **Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka (KQMC),** si ay uga dhagaystaan warbixin faahfaahsan oo ku saabsan hawlaha ay guddidu qaranka u hayso iyo caqabadaha ka jira gudashada waajibaadkeeda.
- **04 April 2026** Guddida Arrimaha Bulshadu waxay kulan la yeelatay **Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka Marwo Samsam Maxamed Saalax**

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Aamina Cilmi Fariid Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Siciid Jaamac Xasan Gudoomiye ku-xigeen**

## Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddida Arrimaha Dibada, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maalgashigu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 57$^{aad}$ ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 13aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **21 February 2026** Guddida Arrimaha Dibadu ee Goluhu waxay kulan dadweyne u qabatay qabyo-qoraalka Xeerka Ergooyinka Diblumaasiyadeed oo gudiddu gacanta ku hayso si ay dadwenaha ula wadaagto Xeerkaas ugana qaybgaliso dadweynaha.

## Xeerarka ay Gudiddu Golewaynaha u soo gudbisay

- **15 Dec 2025** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay laba Xeer oo kala ah
  - Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Maalgashiga iyo
  - Xeerka Warshadaha

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **06 April 2026,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, intaas ka dib Xubnaha Gudiddu waxay kulankoodii ugu horeeyay ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Raambo) Gudoomiyaha Gudidda.**
- **Md. Khadar Cali Xasan Gudoomiye ku-xigeen**

## GUDIYADII GAAR AHAA (AD HOC COMMITTEES) EE GOLUHU SAARAY

- Gudi gaar ah oo loo saaray Xeerka Warshadaha: -

**19 January** Waxa Shir-gudoonku Gudi gaar ah (ad hoc committee) u saaray Xeerka Horumarinta Warshadaha si gudiddaas dib u habayn iyo isku soo gurid ugu samayso Xeerkaas iyo waxyaabaha doodda Mudanayaasha ka soo baxay.

## ICTIRAAFKII IYO SOO DHOWAYNTII GOLAHA

**26 December 2025,** Dawlada Israa'iil waxay si rasmi ah u aqoonsatay Jamhuuriyadda Somaliland, waxa ay noqotay dalkii ugu horreeyey ee xubnaha Qaramada Midoobay ka tirsan ee si rasmi ah u aqoonsada Somaliland.

Aqoonsigaas waxay Somaliland looga soo dhaweeyay si heer sare ah, Dawlada iyo shacabka Somaliland waxay ka sameeyeen fal-celin taariikhda galay, iyadoo shacabka Somaliland si wayn ugu debaal degay aqoonsigaas, dawladuna waxay ku tilmaantay **"guul taariikhi ah"** iyo tallaabo furaysa albaabka aqoonsi caalami ah



**Golaha Wakiilladu 27/12/2025** ayuu soo saaray qaraar soo dhawayn iyo mahadnaq ah, isagoo si rasmi ah u soo dhaweeyey una taageeray go'aanka Dawladda Israa'iil ee aqoonsiga madax-bannaanida iyo jiritaanka Jamhuuriyadda Somaliland, isaga oo ku tilmaamay tallaabo taariikhi ah oo muhiim u ah himilada aqoonsi-raadinta Somaliland.

Goluhu wuxuu sheegay in aqoonsigan uu xoojinayo sharciyadda iyo xaqa shacabka Somaliland ee ku aaddan is-maamul iyo madax-bannaani, isla markaana uu ka tarjumayo qiyamka dimuqraadiyadda, caddaaladda, iyo ixtiraamka sharciga caalamiga ah.

Sidoo kale, Golaha Wakiilladu wuxuu xusay doorkii taariikhiga ahaa ee Israa'iil, isagoo tilmaamay in tallaabadani ay sii adkaynayso xidhiidhka labada dhinac iyo taageerada caalamiga ah ee Somaliland mudada dheer raadineysay.

Warbixintu waxay sidoo kale ugu baaqaysaa beesha caalamka iyo dalalka kale inay ku daydaan tallaabada Israa'iil, isla markaana ay aqoonsadaan Somaliland si loo xaqiijiyo xaqa shacabka Somaliland ee aayo-ka-tashigooda.

Dhanka kale, Golaha Wakiilladu wuxuu cambaareeyey faragelin kasta oo dibadeed oo lagu sameeyo arrimaha gudaha Somaliland, isagoo adkeeyey in Somaliland ay sii wadi doonto ilaalinta dimuqraadiyadda, nabadda, xasilloonida, iyo qiyamka dowladnimada casriga ah.

Ugu dambayn, Golaha Wakiilladu wuxuu caddeeyey in cid kasta oo ka hortimaadda danaha qaran iyo aqoonsi-raadinta Somaliland loo arki doono mid ka soo horjeedda maslaxadda qaranka.

## KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH

- **Wafti Xildhibaan ka tiran Baarlamaanka Dalka Kenya**

Guddoomiye Ku-xigeennada 1aad Md, Siciid mire Faarax (Giire) iyo Guddoomiye ku xigeenka 2aad Md. Cali Xaamud Jirbriil ee Golaha oo ay weheliyaan Xildhibaano ka tirsan Golaha Wakiillada, ayaa si diirran u soo dhaweeyay **Mudane Aadan Xaaji Yuusuf** oo ah xildhibaan ka tirsan **Baarlamaanka Dalka Kenya.**



- **Safiirada Somaliladn u fadhiya Dalalka Holland iyo Sweden**

**14 February 2026** Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, ahna Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha, Mudane Siciid Mire Faarax (Giire), ayaa hadhimo-sharaf ku maamuusay Safiirrada Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya dalalka Holland iyo Sweden, kuwaas oo safar shaqo ku jooga dalka.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**